# Guurku waa go'aan qaadasho weyn. Waa kuwanaa siyaallaha aad ku ogaan karto inaad diyaar u tahay

Guurku wuxuu noqon karaa wakhti xiiso leh, balse hadana waa go'aan qaadasho weyn. Maaha wax ay tahay in loo arko wax iska fudud. Mararka qaar, fikradda guurku waxay sidoo kale nagu dhalin kartaa walaac ama inaan welwelno. Ka hor intaadan qaadin tilaabada xigta, waa muhiim inaad eegto dhamaan fursadaha kuu furan, sidoo kalena aad ogtahay xuquuqdaada, oo aad si qoto dheer uga fakerto saamaynta uu guurku ku yeelan karo noloshaada. Taasi waxay kaa caawin doontaa inaad ogaato in la joogo wakhtigii saxda ahaa ee aad guursan lahayd, inaad heshay qofkii saxda ahaa, ama aad qaado talaabada saxda ah ee adiga kugu habboon.

## Waxaan ka shaqaynaa xuquuqda haweenka muslimiinta ah

- Iyada oo lagu awoodgelinayo in dumarku ay aayahooda ka tashadaan
- Waxaanu keenaynaa nidaamka xuquuqul insaanka si looga hortago arrimaha cadaalad darada iyo xaqdarada ah
- Inagoo u shaqeyn doona shakhsiyaad, bulshooyinka iyo dawlada si loogu doodo isla mar ahaantaasna wax laga barto arrimaha la xiriira sinaanta ee xaaladda dalkan Australia

## Xarunta Haweenka Muslimiinta ah ee Australia ee Xuquuqda Aadanaha (Australian Muslim Women's Centre for Human Rights)


**Taleefanka:** 03 9481 3000

**Iimayl:** reception@amwchr.org.au

**Boostada:** PO Box 826 Waqooyiga Melbourne VIC 3051

**Tixraaca:** intake@amwchr.org.au


Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan dhamaan adeegyadayada iyo shaqada u doodista booqo www.amwchr.org.au

Australian Muslim Women's Centre for Human Rights
*Equality without Exception*

Somali | Soomaali

Australian Muslim Women's Centre for Human Rights
*Equality without Exception*



# Beryahan dambe ma ka fakaraysay inaad guursato?

## Marka hore – muxuu sharcigu ka yiri guurka?

**Australia gudaheeda, guurka sharciga ahi wuxuu u dhexeeyaa laba qof oo da'da sharcigu qabo gaaray wada oggolna inay is guursadaan. Oggolaanshaha macnaheedu waa in qof kasta ee guurkaas qeybta ka ahi uu si buuxda u fahansan yihiin in guurku dhacayo, ogyihiina cidda ay guursanayaan, isla markaasna si xor ah u aqbaleen guurka. Waa inaad sidoo kale da' ahaan ka weyn tahay 18 sano si aad u oggolaato guurka. 'adoo xor ah inaad oggolaato' guurka macnaheedu waxay tahay in qof kastaa uu rabo oggolyihiina guurka. Haddii qof lagu khasbay inuu 'inay oggolaadaan' iyadoo loo hanjabayo, ama cadaadis la saarayo, ama been loo sheegay, ama la khiyaanay, ama la dhibaateeyay markaa tani ma ahan oggolaansho. Guur aan oggolaansho loo helin wuxuu ka soo horjeeda sharciga.**

## Ka warran guurka labada qof lais baray?

In waalidiinta, qoyska, ama xubnaha kale ee bulshada ka tirsan ay is baraan labada qof ee is guursanaysa, waxay noqon kartaa wax caadi u ah bulshooyinka qaar. Guurka labada qof la isbarayo, kalsoonida waxaa la siiyaa waalidiinta ama xubnaha kale ee qoyska si ay qofka ugu dooraan ama ugu soo bandhigaan lamaane, laakiin labada qof ee is guursanaysa waxay weli leeyihiin ikhtiyaar ay ku dhihi karaan 'maya' ama 'haa'. In qofka cadaadis la saaro qeyb kama aha guurka labada qof la isbarayo oo haddii aad dareemayso cabsi ah in aadan maya dhihi karin, ama aad dareemayso in aadan diidi karin, markaas waxaa laga yaabaa inaad la kulmayso cadaadis ama in wax lagugu khasbayo oo kale.

Mararka qaark dadka kugu xeeran ayaa laga yaabaa inay sidoo kale isku dayaan inay isticmaalaan diinta si ay kuugu cadaadiyaan inaad guursato, si kastaba ha ahaatee taasi maaha qayb ka mid ah diinta. Diinta Islaamka marka laga hadlayo, ragga iyo dumarku waxay xaq u leeyihiin inay si xor ah u doortaan lamaanahooda. Waxa ay xaq u leeyihiin in ay aqbalaan ama diidaan qofkii loo soo bandhigo, xaqaasina waa qayb asaasi ah oo ka mid ah guurka Islaamka.

## Go'aan ka gaarista guurka ee adiga kuu khaaska ah

Markaad ka fekereyso guur, waxaa jira dhowr su'aalood oo aad naftaada weydiin karto si ay kaaga caawiyaan inaad go'aansato in go'aankaagu uu yahay midka saxda ah iyo in kale:

- Nafsadeyda si fiican ma u garanayaa si aan qof kale ula midoobo oo aan xiriir hoose u wada yeelano?
- Waa maxay hadafyadeyda mustaqbalka dhow ah iyo kuwa mustaqbalka fog, sideese laga yaabaa in guurku u saameeyo awoodda aan ku gaari karo hadafyadaas?
- Qofkani ma yahay qofkii aniga igu haboonaa? Miyaanu leenahay qiyam isku mid ah? Miyay igu taageeri lahaayeen sidii aan ku gaari lahaa hadafyada aan ka leeyahay nolosha?
- Qofka aan rabo in aan is guursano ma waxay leeyihiin awood iyo xakameyn ka sarreysa mida aan anigu leeyahay? Tusaale ahaan miyay iga weyn yihiin? Dhaqaale ahaan ma qofkaas kale ayaan ku tiirsanaan doonaa? Ma waxay heystaan sharci degenaansho ama heer bulsho oonan anigu gaarin? Hadii

  ay jawaabtu haa tahay, sidee bay tani u saamayn kartaa xulashooyinkayga iyo hadafyadeyda nolosha ee mustaqbalka?
- Ma filashada qoyskayga iyo bulshada ayaan ka sarreysiiyay aniga baahidayda?
- Maxaa dhacaya hadii aanan hadda guursan, ama haddii aan idhaahdo 'maya'?
- Qof weyn oo guur gaaray ma ahay?

## Guurku waa wax aad adigu ikhtiyaar u leedahay

Haddii aad gaartay da'da sharcigu qabo inaad oggolaansho bixiso, haddii aad si xor ah u rabto in aad guursato, iyo haddii aad tixgelisay saameynta uu go'aankaagu ku yeelan karo mustaqbalka dhow iyo tan fogba, markaa waxaad xaq u leedahay inaad hore ugu sii socoto go'aankaaga. Laakiin haddii aad ka yar tahay da'da 18, haddii aad la kulanto wax cadaadis ah, ama haddii aad u maleyneyso in hadda aysan ahayn waqtigii kugu habboonaa, markaa waxaad xaq u leedahay inaad tiraahdo maya.

Haddii aad dareemayso walaac, walwal, ama aanad hubin guurka soo socda, ama haddii aad wax walaac ah ka qabto inaad tiraahdo 'maya' ma rabo guur, waxaa jira adeegyo aad la xiriiri karto si aad u hesho taageero. Shaqaalaha ka shaqeeya adeegyadan waxaa loo tababaray inay dhagaystaan ayna kaa caawiyaan baahiyahaaga.

### Hoos waxaa ku taxan nambaro aad wici karto si aad u hesho macluumaad dheeraad ah iyo taageero iyadoo ay wax kastaana sir kuu yihiin

**Xarunta Haweenka Muslimka ah ee Australia oo Xuquuqda Aadanaha** - 03 9481 3000

**The Salvation Army** – 1800 000 277

**Nolol Aan Caqabado Lahayn** – 1800 403 213

**Australian Red Cross** - 03 9345 1800